



Xubnaha bulshada oo lagu martiqaaday inay soo dalbadaan gudiga kaasoo ka talabixin doona xuduudaha Koonfurbari

Iyadoo ay billaabnayso shaqada ay wadaan dugsiyada dawladda maamusho ee Portland dadaalkaas oo ay ku dheelitirayaan xuduudaheena iyo barnaamijyada, waxaan raadinaynaa xubno gudi si ay ugu adeegaan hogaaminta barnaamijka laga qabanayo Koonfurbari Portland –wajiga ugu horeeya ee dadaalka dagmada oo dhamaystiran.

Qoysaska iyo xubnaha mujtamaca ee xidhiidhka la leh dugsiyada ku yaal Koonfurbari Portland waxaa lagu martiqaadayaa inay soo codsadaan isbahaysiga xogaaminta kaas oo dib u eegid ku samayn doona qabyo qoraalada, eegina doona waxa bulshadu ku darto iyo iyagoo samayn doona talo soo jeedin ku saabsan xuduudaha cusub, habka dugsi quudiyaha iyo meelaha barnaamijka gaarka ahi ka socdo.

Xubnaha la doortay waxaa laga codsan doonaa in ay noqdaan kuwo laheli karo si ay uga qayb galaan kulamo, soo dhaweyn furan iyo isu imaadyo kale maalmaha khamiisaha ah, laga soo bilaabo 6 illaa 8 g.d. , inta lagu gudo jiro bisha Noofambar 2020. Xulafadu waxay kulmi doonaan laga billabo bisha Abril ilaa Juun, intaa ka dibna Sibtambar ilaa Noofambar, goobtuna waa meel ku taal Koonfurbari Portland. Xanaanada caruurta iyo turjumaanaduba waxay noqonayaan diyaar.

Qabashada araajida, taasoo furantay, Salaaso 3 Maarso, waxay xidhmaysaa 17 Maarso. Dadka araajida soo qortay waa la ogaysiin doonaa hadii la soo xusho marka bishu tahay 20 Maarso. Kulanka ugu horeeya ee hogaaminta xulafadu wuxuu qabsoomi doonaa maalinta Khamiista ah 20 Abril.

[Halkan guji si aad u dalbato](#)

Diwaangalinta iyo shaqada dheeli tirka barjaamijku waxay ka billaaban doontaa Koonfurbari Portland iyadoo diirada la saarayo in la dhigo oo la tago xuduudaha dugsiyada dhere ee cusub casrigana ah ee Kellogg, Kaasi oo la furi doono dayrta 2021. Go'aanka ugu dambeeya ee xuduudaha iyo habka quudiyaha ee dugsiyada Koonfurbari waxaa sameyn doona xubnaha gudiga waxbarashada xiliga jiilaalka ah ee 2021, iyadoo isbedeladu ay dhaqan galayaan marka la gaaro 2021-22 sannad dugsiyeedkaas. Shaqada dheelitirka inta soo hadhay ee dagmada ayaa xigi doonta.

Kulankoodi dhacay todobaadkii la soo dhaafay, xubnuhu waxay soo saareen habraac iyagoo ku meel mariyey codad dhan 7-0, xadiga shaqo kaasi oo lagu dajiyey yoolalka iyo hababki loo mari lahaa sida loo habaynayo dagmada guud ahaan.

“Shaqadani waxay ahayd mid mudo dheer hakad ku jiro, waxaan u malaynayaa in ay keeni doonto in si aad u waxtarbadan loo adeegsado goobaheena,” Agaasimaha Gudida Rita Moore ayaa ka sheegtay kulanka. “Iyadoo taa micnaheedu yahay in aynu inagu awood u yeelan doono sida hada si ka wanaagsan inaan u siino dhamaan ardaydeena goobo waxbarasho.”

Faaqidaadii FLO, oo ah qandaraasihii kala shaqaynayey dagmada mashruuca, ayaa sameynaya faaqidaad dagmada oo dhamaystiran ah kaasi oo la sii dayn doono dhamaadka bishan. Faahfaahin dheeri ah iyo xogta qoraalada la kaydiyey ee ku saabsan diwaangalinta iyo barnaamijka dheelitirka waxaa laga heli karaa www.pps.net/enrollmentbalancing.